Australian Government

# MULTICULTURAL AUSTRALIA

United, Strong, Successful

– Australia's multicultural statement –

***Australia Dhaqanada-badan – oo midaysan, xooggan, oo guulaysan waa bayaanka dadeynaha ee Dowladda oo balan-qaadaysa Australia Dhaqanada-badan; samaynaysa mudnaanaha iyo jihooyinka xeeladaysan ee sanadaha soo-socda.***

# Horudhac

## Ra’iisul-wasaaraha Australia

Australia waa bulshada dhaqanada-badan oo guulaysan ee adduunka.

Waxaan nahay dadkii Australia ee ugu-horeeyey, dhaqankii aadanaha oo weli-jirana ugu weyn adduunka dushiisa, kuwaas oo daryeelayey waddankooda in ka badan 50,000 sano.

Waxaan u dhalin yarnahay sidii cunug yar marka loo eego hooyadeedii soo-haajiridda taas oo ka timid qaran kasta, caqiido kasta, cunsur kasta ee adduunka ah.

Australia waa qaran socdaal. Ugu badnaan kala-badh dadweynaheena hadda jira ama wuxuu ku dhashay dibadda ama wuxuu haystaa hal waalid oo dibadda ku dhashay.

Waxaan ka nimid dhaqan kasta, cunsur kasta, caqiido kasta, qaran kasta.

Nama qeexo cunsur, diin ama dhaqan keliya, hase ahaatee waxaa na qeexa qiyamka la wadaago ee xoriyadda, dimooqaraadiyada, xukunka sharciga iyo u-sinnaanta fursadaha – “halloo sinaado”.

Koolada isku-kaaya haysaa waa ixtiraamka la-wadaago – aqoonsiga xooggan oo mid kasta oo naga mid ah uu xaqa u leeyahay ixtiraam isku-mid ah, sharaf isku-mid ah, fursadaha isku-midkaa.

Nabadgelyada qaraneed – waa go’aanka adag si loo difaaco qarankeena, dadkeena iyo qiyamkeena – waa aasaaska kaas oo xoriyaddeenu ku dhisantay oo ay tahayna in la ilaaliyo.

Waqtigan oo xiisadaha caalamka kordhayaan iyo mustaqbalka aan la hubin, Australia waa tusaalaha kusii-adkaanta qaranka iswaafaqsan, sinnaanta iyo ganacsiga, oo aqbalaysa kala duwanaanteeda.

*Bayaankeena Australiyada dhaqanada-badan:* oo *midaysan, xooggan, oo guulaysan* wuxuu dib-u-cusboonaysiinayaa oo adkaynayaa ballan-qaadka Dowladda ee Australiada dhaqanada-badan, kaas oo cunsuriyaddu iyo takoorku aysan boos ku lahayn.

Waxaan usoo-jeedinayaa *Bayaankeena Australiyada dhaqanada-badan:* oo *midaysan, xooggan, guulaysan* dhammaan dadka Australia oo dhan.



**The Hon Malcolm Turnbull MP**

Raiisul-wasaaraha Australia

# Farriinta wadajirka ah oo ka socota Wasiirka Adeegyada Bulshada iyo Ku-xigeenka Wasiirka Adeegyada Bulshada iyo Arimaha Dhaqanada-badan

Dhammaan dadka Australia waxay ku faani karaan bulshadeena dhaqanada-badan ee xooggan oo guulaysan. Taariikhda Australia waxaa bilaabay waa hore dadka Australia ee Aboorjiinka iyo Torres Strait Islanderka, waxayna ku kortay samaysankii haya'daha Britishka, waxayna ku socotaa dad kasoo kala jeeda dhulal kala fog oo ballaaran.

Xoriyadda iyo nabadgelyada aan ku raaxaysanayno maahan mid iska timid. Dowladihii isku-xigxigay waxay sameeyeen aragtida bulshadeena taas oo adkaynaysa kala-duwanaanta isla markaana xoogasarayso aqoonsigeena qaraneed ee gaarka ah iyo muhiimadda ahaanshaha dad isku-xiran oo midaysan.

Cahdigan oo dad badan ay ku koreen ayagoo ka xun korodhka argagixisada iyo xagjirka, ma jiro waqti ka fiican si loo adkeeyo ballanqaadkeena adag ee dimooqaraadiyada, fursadda, iyo qiyamkeena aan wadaagno.

Dowladda Australia waxay ballanqaaday nabadgelyada qarankeena iyo xoriyadda dadkeena. *Bayaankeena Australiada dhaqanada-badan:* oo *midaysan, xooggan, oo guulaysan,* Dowladdu waxay qeexaysaa qiyamka wada guusheena waagii hore waxayna naga caawin doontaa inaan u halgano mustaqbalka.

Bayaankan wuxuu aqoonsan yahay in kala-duwanaanta dhaqaneed inay tahay xooggeena nagu weyn, midka hubaynaya inaan abuurno mustaqbal halkaas oo cid kasta ka mid tahay ayna haysato fursad ay ku noolaato nolol fiican. Waxay adkaynaysaa tiir-dhexaadka haya'daheena dimooqaraadiga ah iyo xukun sharciga, waxay muujinaysaa muhiimadda muwaadinimada ee aqoonsiga qaranimadeena, waxay qeexaysaa masuuliyadda naga saaran inaan ixitiraamno dadkeena Australia.

Bayaankan waa asaaska aan ku sii dhisayno bulshadeena dhaqanada-badan waxaana eegaynaa inaan kala shaqayno dadka Australia raaciddooda aan daalka lahayn ee xoriyadda iyo barwaaqada.

**The Hon Christian Porter MP**

Wasiirka Adeegyada Bulshada

**Senator Hon Zed Seselja**

Ku-xigeenka Wasiirka Adeegyada Bulshada iyo Arimaha Dhaqanada-badan

## *Australia Dhaqanada-badan – oo midaysan, xooggan, oo guulaysan*

**Taariikhdeena la-wadaago**

Australia waa bulshada dhaqanada-badan oo guulaysan ee adduunka, taas oo midaysa dhaqano, waayo-aragnimooyin, caqiidooyin, iyo hiddooyin fara-badan. Waxaa noogu wacan guulaheena qaran ahaan tabarucaadkii in ka badan 300 awooweyaal kala-duwan — laga soo bilaabo dadkii Australia ee hore ilaa iyo soo-galootiga cusub.

Waxaan ka soo uskunay qayb ahaan oo ay ku mahadsan tahay kala-duwanaanteena dhaqaneed taas oo ku salaysan qiyamkeena guud iyo ballanqaadkeena xoriyadda, nabadgelyada, iyo barwaaqada.

Qarankeenu waxaa hodan ka dhigay dadka Aboorjiinka iyo Torres Strait Islanderka, dhaqanka nool ee ugu da'da weyn meeraha, iyo malaayiinka dadka kuwaas oo doortay inay noloshooda cusub ka samaystaan halkan.

In ka bdan 50,000 sano ayaa dadkii Australia ugu horreeyey ku noolaayeen, wax ku barteen, la-qabsadeen oo ku badbaadeen dhulalka aan hadda ku magacowno Australia. Ayagoo derisyo isla ah, waxay ka koobnaayeen in ka badan 250 kooxo luqadeed kala duwan ee 'quruumo' ku jira qaaradda, oo mid kastaa leeyahay dhaqano, caqiidooyin, iyo lahjado ugaar ah.
Faracii quruumahan waxay ka joogaan dhaqan jira ee ugu da'da weyn meeraha waxay leeyihiin waqtiyada sheekooyinka iyo meelaha ka baxsan xusuusta dad kasta oo kale.

Sheekadu waxay la sii socotaa asaaska Australiyada casriga ah, ayadooka timid degaanadii Biritishka iyo Irishka iyo samaysankii dimooqaraadiyadeena baarlamaanka ah, haya'daheena, iyo sharciga. Intii muddo ah, sheekadeenu waxay ka dhalatay i malaayiinka dadka oo ka soojeeda qaaradaha oo dhan kuwaas oo Australia ka dhigtay gurigooda.

Maanta, dadka Australia way soo-dhweynayaan kuwa usoo-haajirey halkan si ay qayb uga noqdaan bulshadeena xorta ah, oo furfuran, si ay u abuuraan noloshooda ayna wax ku deeqaan qarankeena.

Intii muddo ah arintan waxay ka imaanaysey dad badan oo gacan ka gaystey dhismaha kaabayaasheena, nooleeyey bulshooyinkeena, kor-u-qaaday waayo-aragnimooyinkeena dhaqaneed, kordhiyey fursadaheena iyo, tan ugu weyna, balaariyey habka aan u aragno oo aan ula dhaqano adduunka.

Abuuridda waajibaadka loo siman yahay ee u dhaxeeya dowladda, bulshada, iyo shaqsiyaadka – ayadoon loo eegayn dhalashada – waxay xoojinaysaa adkaysigeena iyo dareenkeena ka mid ahaanshaha.

Wadajir waxaan dhisnay Australia casri ah oo barwaaqo ah ee aan maanta haysano, oo aan ku dhisnay qiyamkeena, xuquuqdeena iyo waajibaadkeena la-wadaago.

**Qiyamka la-wadaago**

Qiyamkeena ayaa na mideeya oo abuura xiriir bulshadeedka noo dhaxeeya. Waxay bixiyaan asaaska bulshadeena iyo mustaqbalka la-wadaago kaasoo cid kastaa ka mid tahay. Qiyamkeenu waxay ku salaysan yihiin:

***IXTIRAAM***

Waxaan ixtiraamnaa oo ballanqaadnaa xukunka sharciga iyo daacad u ahaanshaha Australia.

Waxaan ixtiraam u haynaa xoriyadda iyo sharafta shaqsiyaadka oo dhan.

Waxaan qadarinaa kala-duwanaanta oo tixgelinaa ixtiraamka, ka-mid ahaanshaha, caddaalladda, iyo naxariista.

***SINNAAN***

Waxaan taageernaa sinnaanta raga iyo haweenka.

Waxaan rumaysanahay sinnaanta sharciga hortiisa.

Waxaan rumaysanahay u-sinnaanta fursadaha loo dhan yahay.

***XORIYAD***

Balanqaadkeena xoriyadda iyo asalnimada.

Waxaan taageernaa xoriyadda fikirka, hadalka, diinta, ganacsiga, iyo ururka.

Waxaan ballanqaadaynaa diimooqaraadiyadda barlamaanka ah.

Waxaan qaadaynaa masuuliyadda ka-soo-bixidda waajibaadkeena shibilka ah.

Falalka iyo dabeecadaha wiiqa qiyamkeena meel kuma lahan Australia

Dhammaantayo waxaan ka faai’dnaa guusha dhaqaale ee qarankeena, xoriyadda dhaqaneed iyo diimeed, iyo kala-duwanaanteena. Ilaalinta ballanqaadka xooggan ee qiyamkeena guud waa danaha ugu fiican ee dadka Australia.

**Xuquuqda iyo waajibaadka la-wadaago**

Waxaan aqoonsanahay muhiimadda ay leedahay is xushmaynta iyo waajibaadka labada dhinac ah. Guusheenu maaddaama aan nahay bulsho dhaqano-badan waxaa ugu wacan isku-dheelitirnaanta xuquuqda iyo waajibaadka kaas oo hubiya bulsho deggan, adkaysi leh, oo haboonaan leh halkaas oo aan raadino inaan siino qof kasta fursadda inuu wax ku deeqo — oo ka faai’do — barwaaqadeena.

Teenu waa bulsho ku salaysan hiddaha dimooqaraadiyada xorta ah kaas oo xuquuqda asaasiga ah ee shaqsiga aan la jebin karin.

Muwaadinimadu waa mudnaan iyo, ayadoo qayb ka ah Xafladda Muwaadinimada Australia, muwaadiniinta cusub waxay balan-qaadeen oo adkeeyeen '*daacad u ahaanta Australia iyo dadkeeda, kuwaas oo citiqaadkooda dimooqaraadiyada aan la wadaago, kuwaas xuquuqda iyo xoriyaddaha aan ixtiraamo, iyo kuwa shuruucdooda aan haysto oo aan adeeco'.*
Dadka Australia waxay si xaq ah u rajaynayaan in qof kasta kaas oo waddankeena jooga, ha ahaadeen ama yaysan ahaane muwaadiniin Australia ah, inuu adeeco shuruucda Australia, taageero habka dimooqaraadiyada, wuxuuna ula-dhaqmayaa dadka oo dhan ixtiraam iyo is-xushmayn.

**Australia ammaan iyo nabadgelyo ah**

Waxa salka u ah Australia kala-duwan oo iswaafaqsan waa nabadgelyada qarankeena. Dowladda Australia waxay siisaa mudnaanta ugu sarraysa ammaanka iyo nabadgelyada dadka Australia oo dhan. Weeraradii argagaxisada ee dhawaa oo adduunka ka dhacaya waxay si macquul ah u sababeen dareen ka dhex-jira bulshada Australia.

Dowladdu waxay ka falcelinaysaa khataraha ayadoo sii-wadaysa inay maalgeliso ka-hortagga-argagixisada, xudduudaha xooggan, nabadgelyada qaraneed oo xooggan. Taasi waxay gacan ka gaysanaysaa si loo hubiyo in Australia ahaato bulsho furfuran, laga-wada-mid yahay, xor ah, oo ammaan ah.

Ka-hortagga khataraha, si kastaba ha ahaatee, kama tanaasulayno qiyamkeena la wadaago iyo midnimada ummaddeena. Dowladdu waxay xaqiijinaysaa inaanu sida ugu fiican u-xoojino ammaanka bulshada Australia anagoo xooggasaarayna waxa na mideeya waxna ka qabanayna faraqyada u dhaxeeya xushmadda labad dhinac ah.

**Aragtida la-wadaago ee mustaqbalka**

Australia waxay ku midaysan tahay ballanqaadka la-wadaago ee qarankeena iyo haya'daheena dimoqaraadiga ah iyo qiyamkeena. Anaga oo dhan waxaa lagu dhiirigelanayaa inaan kor-u-qaadno aqbalidda iyo garashada, iyo inaan hubino in bulshadeena sii-wado inay ahaato mid ammaan ah, is-haysata, oo iswaafaqsan.

Bayaankan, Dowladdu waxay sii-wadaysaa horumarinta xeerka xushmadda labada dhinac ah iyo canbaaraynta naceybka cunsuriga ah iyo takoorka inuu yahay midaan boos ku lahayn bulshada Australia.

Waxay kaabaysaa qorsheyaasha iyo barnaamijyada kale ee Dowladda, kuwaas, oo ay la jiraan dhowr nashaadyada bulshada iyo folanteerada, kuwaas oo dhiirigeliya, taageera oo sii-wada midnimadeena. Tusaale ahaan:

- Barnaamijka Ingiriisiga ee Soogalootiga Dadka Waaweyn wuxuu taageeraa in soogalootiga iyo qaxootida saxda ah inay bartaan luqadda Ingiriisiga asaasiga ah iyo xirfadaha degitaanka si ay u awoodsiiyaan inay ka-qaybgalaan bulshada Australia bulsho ahaan iyo dhaqaale ahaanba.

- Qorshaha Helitaanka iyo U-sinaanta Dhaqanada-badan ee Dowladda wuxuu hubinayaa in barnaamijyada iyo adeegyada inay daboolaan baahiyaha dhammaan dadka Australia, wax kastoo ay tahay asalkooda dhaqaneed iyo luqadeed.
- Waddooyinka loo maro muwaadinimada waxay siiyaan soo-galootiga cusub fursadda inay noqdaan ka-qaybgaleyaal buuxa oo firfircoon bulshada madaniga.
- Dowladdu waxay taageertaa warbaahinta dhaqanada-badan oo xooggan oo kala-duwan oo ka baxa raadiyaha, daabacaadda, onlineka iyo taleefishinka.
- Maalinta Is-waafaqsanaanta waxaa la sameeyey 1999 hadana waxaa u damaashaadaa kumanaan dadka Australia ah sannad kasta, ayagoo fidinaya farriimaha u-dhammaanshaha, ixtiraamka iyo ka-mid ahaanshaha qof kasta.
- Golaha Dhaqanada-badan ee Australia wuxuu u taagan yahay haya'dda la-talinta ee ugu muhiimsan, kaas oo siiya talooyin xooggan oo madaxbannaan Dowladda.

Dadka Australia uma qaataan is-waafaqsanaanteena iyo barwaaqadeena mid iska-timid. Wadajir ahaan — ka-shaqsiyo ahaan, kooxo ahaan iyo heerar kasta ee Dowladda, — waxaan sii-wadi doonaa inaan abuurno bulshooyin xooggan, aad isu-wada-dhan oo barwaaqaysan, oo ay hogaaminayso qiyamkeena la-wadaago iyo raacidda jihooyinka xeeladaysan.

## Dhiirigelinta ka-qaybgalka dhaqaalaha iyo bulshada ee soogalootiga cusub

Australia waxay leedahay sooyaal qani ah ee soo-galootiga wax ku tabarucaya asaaskeena bulshadeed iyo dhaqaaleed. Taasi waxay ku socotaa maanta bulshadeena dhaqanada-badan ee wadajirta taas oo siinaysa fursadaha soogalootiga cusub si ay wax ugu tabarucaan guusha qarankeena.

Wadajirka, dadaalka bulshooyinkeena, dugsiyadeena, haya'daha aan-faai'do-doonka ahayn, haya'daha diimaha-ku-salaysan, loo-shaqeeyeyaasha, iyo dowladaha waxay siinayaan fursadaha dadka si ay si habboon wax ugu tabarucaan bulshada Australia.

Dadka kuwaas oo usoo haajirey Australia waxay wadaagaan raadinta fursadaha cusub ama nolosha wacan.

Isla markaas, is-dhexgalka dhaqaaleed iyo bulshadeed ee soogalootiga cusub iyo qoysaskooda waa u lagama maarmaan mustaqbalkooda. Dareemidda ku-xirnaanta gurigooda cusub iyo ka mid noqoshada qayb bulshada Australia ah waxay abuuraysaa dareenka qiimaha iyo ka mid ahaanshaha.

Dowladdu waxay bixisaa qaab dejineed, oo si weyn loogu haysto inuu yahay habka ugu fiican, oo loo qorsheeyey inuu ku caawiyo soogalootiga cusub noloshooda Austaralia. Barnaamijyada dejinta waxay taageeraan soogalootiga si ay u nodaan kuwo isku-filan oo ah xubno firfircoon ee bulshada Australia.

Soogalootiga cusub qaarkood, gaar ahaan kuwa barnaamijka qaxootiga iyo banii-adamnimada ee Australia, waxay ka faai'daan taageero gaar ah. Tana waxaa ka mid ah

caawimaadda barashada Ingiriisiga iyo helidda waxbarashada lagama maarmaanka ah iyo xirfadaha shaqada. Dowladdu waxay ballanqaadaysaa caawinta sogalootiga baii-adamnimada intay ku jiraan shanta sano ee ugu horreysa kadib imaanshahooda Australia, si ay u abuurtaan nolol wacan ayna u noqdaan dad isku filan, oo ah xubnaha bulshada oo waxtar ah. Dowladda Australia wxay hadda dib-u-habayn ku samaynaysaa adeegyada dejinta si loo hagaajiyo natiijooyinka luqadda Ingiriisiga, waxbarashada iyo dhaqanada ee dadka soogalootiga banii-adamnimada ah.

## Isku-xirka faai'dooyinka kala-duwanaanteena iyo danta qarankeena ee la-wadaago

Ingiriisigu wuxuu yahay oo sii ahaan doonaa luqadda qarankeena waana aalad lagama maarmaan u ah isdhexgalka soogalootiga. Isla markaas, xooggaga shaqaalaheena laba-luqadlaha ah wuxuu ballaarinayaa jihooyinka ganacsi wuxuuna xoojinayaa tartanka Australia ee ka jirta dhaqaalaha caalamka ee soo koraya.
Kala-duwanaanshaheena dhaqaneed waa mid ka mid ah hantideena ugu weyn – waxay kicinaysaa ikhtiraaca, wax-abuurka iyo firfircoonida. Dhaqaalaheenu waxaa xoojiya xirfadaha, aqoonta, kartida luqadeed, shabakadaha iyo wax-abuurka xooggaga shaqaalaheena kala-duwan. Wax-soosaarkeena iyo tartankeena waxaa kor-u-qaada kartideena inaan ictiraafno oo ka-faai'daysano fursadaha howlgelinta dhaqaaleed ee caalamiga ah.

Taana waxaa ka mid ah kartida soogalootiga ku-meelgaarka ah oo badan kuwaas oo ku tabaruca dhaqaalaha iyo bulshada Australia intay halkan joogaan. Kuwo badan baa si joogto ah udega Australia, marka kuwa kalena ay ku noqdaan waddankoodii hooyo ama waxay u guuraan waddamo kale, taas oo sii-xoojinaysa dhaqankeena, ganacsigeena iyo fursadaheena dhaqaale ee dibadda.

Dowladda, ganacsiyada iyo warshadaha dhammaan waxay ka qayb qaataan xagga horumarinta iyo sarraysiinta manfacyada xooga-shaqaalaheena kala duwan.

## Sii-wadidda abuuridda bulshooyin is-waafaqsan oo bulsho ahaana wadajira

Qiyamkeena Australia ee la-wadaago waa rukunka barwaaqadeena dhaqaale iyo sidoo kale bulshada bulsho ahaan isku-dhan.

Wadaagidda hiddaheena dhaqaneed waa qayb ka mid ah damaashaadka waxa loola-jeedo in Australian la noqdo iyo caawinta cid kasta si uu u dareemo inuu ka mid yahay bulshada. Is-waafaqsanaanta bulshada waxay abuurtaa midnimada qaraneed. Waayo-aragnimooyinka guudna waxay abuuraan sooyaalka la wadaago waxayna qaabeeyaan mustaqballada la-wadaago.

Sidaas cagsigeeda, cunsuriyada iyo takoorku waxay wiiqi karaan bulshadeena. Waxaan canbaaraynynaa dadka kuwaas ah oo kiciya nacaybka cunsuriyeed.

Wada-hadalka joogtada ah ee diimaha iyo dhaqanada dhexdooda ah waa u lagama maarmaan si loo yareeyo suurtagalnimada xiisadaha ka dhex-jira bulshooyinka iyo in la xoojiyo wadajirka iyo iswaafaqsanaanta. Wadahadalkaas oo kale wuxuu caawiyaa inuu

yareeyo cuqdadda, uuna horumariyo isfahamka dhaqannada u dhaxeeya, uuna hagaajiyo calaaqaadka u dhaxeeya kooxaha jaaliyadaha iyo kuwa diimaha, iyo inuu kordhiyo dareenka ka mid ahaanshaha iyo isku-kalsoonaanta.

Ayadoon loo eegayn asalka dhaqankeena, meesha-dhalashada ama diinta, qof kastaa oo Australia ku nool, ama imaanaya Australia waxaa saaran masuuliyada inuu la howlgalo oo raadiyo inuu garto midba midka kale, uuna diido nooc kasta oo cunsuriyada ama xagjirnimada rabshadda leh.

**Gabagabo**

Dowladihii Australia oo isku-xigxigey waxay abuureen ballanqaad adag ee Australia dhaqano-badan. Hadda waxaa la joogaa waqtigii dib loogu cusboonaysiin lahaa oo dib loogu adakyn lahaa ballanqaadkii Dowladda bayaankan cusub: farriinta qeexan oo ku saabsan qiyamka iyo waajibaadka asaaska u ah bulshadeena, taageera danta qarankeena oo haga sidaan uga warcelino taxadiyaadka. Waxay u taagan tahay aragtida mustaqbalkeena oo ah ummad dhaqano-badan oo xooggan oo guulaysan, oo ay midayso daacadnimadeeda aan u hayno Australia aana ballanqaadayno xoriyada iyo barwaaqada.